

# Addeega Gudbiyowka linki talagali

## Reeroo leyiin Ilmooga Yar-yar



amase inweer  
207-287-3991

### WIC Barnaamijka Nafaqada (WIC Nutrition Program)

WIC may in shaqeyyaase bilaamoo uurka le, bilaamoo naasnuujhiyaayan, ii ilmoo ka hooseeyo 5 sinni jir, oo iniski jiraan ilmoo la soo korsidi. WIC may etaa daryeel nafaqo dhamaystiran mayna biyaase hunguri aafimad le, walbarashada nafaqada, kaalmada naasnuujhiyowka ii gudbiyowka lin gudbiyow adeegoo kaleet.



amase inweer  
877-770-8883

### Addeega Koriyowka Ilmoo/Dhehgalowka Hore (Child Development Services/Early Intervention)

Addeega Koriyowka Ilmoo/nidaamka Dhehgalowka Hore may etaa Qeebta Walbarashada Dugsiga Dhehe oo biyaw Dhehgalowka Hore (dhalashada ilaa lama sinni jir) ii walabarashada Dadwiinaga Ki habboon (da'diyoo seddi ilaa shan sinni jir eh) iikoo indhoo ki haayaan Waahda Walbarashada Maine (Maine Department of Education).



amase inweer  
800-698-3624

### Ilmoo Baahida Daryeelka Aafimaadka Gaarka in Baahan (Children with Special Health Care Needs - CSHN)

Ilmoo Baahida Daryeelka Gaarka Aafimaadka in baahan may li shaqeyyaayanaa reerooga leyaan ilmoo baahida daryeelka aafimaadka gaarka in baahan oo sinnidiyoo 22 ka hooseeyo. CSHN may in haga kortee reeroo ii ururoo inii in hallaan kheyriyaad oo in feylenye buuhiyawna baahida onogshoo qabo Shaqaaloo may haga koraana reeroo iyo marsiiaayan nidaamka aafimaadka shal duwan, oo ki hiraayan daryeelka kaas oo ki guuloysada doonaan natiijada inki feyle bukaanka oo inki ma'quulsan.



amase inweer  
1-855-797-4357

### Aymiska Aafimaadka ee Maine (Health Coverage for Maine)

Aymiska Aafimaadka Maine linki talagali (CoverME.gov) may biyaase ma'lumaadki saabsan shal dooradow aymis aafimaad oo bilaash eh ii mid beesadiis hooseyto oo linki talagali reeroo Maine. May kaloo ka hala kortee hage linki talagali ururoo deegaanka oo koo kaalmeeyo koraan inii kasto shal dooradowkaa aymiska ii inii soo buuyto odsiga.



### Qorshaga Daryeelka Badbaadada eh (Plan of Safe Care – POSC)

Qorshaga Daryeelka Badbaadada Maine may liki dheh abuurey daryeel aafimaad amase lang biyaw adeega bulshada, aatha ii/ama daryeelayaasha kaleet, iigoo sheegaayan awood reerka leya ii baahidiyoo, agalka faa'iidada in leya ii fi'ilada laka taageeraw walaaga dhalaanka iyo reerka lin so bandhiki. Qorshaga Daryeelka Badbaadada inta badan may iniski jiraana gudbiyow lin gudbiyow adeega ama siyowka ma'lumaad lakala hiriiraw reeroo linki talagali inii daba rahaan.



amase inweer  
207-441-5852

### Madi Bilow/Madi Bilow Hore (Head Start/Early Head Start)

Head Start may biyeeye walbarashada dhinaanimada inki horeyto oo linki talagali ilmoo yar-yar oo reeroosho la kulumaan hagitanka faqrinimaada federaalka. Head Start may eyaa mid si federaali eh lin maageliyo, barnaamij iskoolka hor la fahmaw eh lin suubiyi si lin buuyo baahiyoo shu'uur, bulshi, aafimaad, nafaqo iyo mid nafaansi in eh ilmoo da'diyoo 3 ilaa 5 sinni jir eh ii reeroosho. May ki kaalmooyaase hormariyowka walbarashada bulshada ee ilmoo mayna kor in qaadasae inii nagadaan dad iski filan iidoo la maraw hab dhamaystiran oo diirada laka saaraw qaabilaada reerka. Barnaamijkan Head Start Hore (may li aasaasey 1994) may eyaa barnaamij wehel eh oo lin abuuri inii ku waramo isla baahida ilmoo dhaladaan ilaa 3 sinni jir ku gaaran, ii aatha la filathaw ii reeroosho.



amase inweer  
1-888-644-1130

### Cradle ME Nidaamka Gudbiyowka (Cradle ME Referral System)

Cradle ME may aawiyaase inii ki hirto adeega saha eh ee mininki ku saleesan ii dhinaanka oo bilaash eh. Cradle ME may iskaashi li letaa lama barnaamij: Barnaamijka Naasnuujhiyowka Aafimaadka le ii Reeroo Maine.



### Reeroo Maine (Maine Families)

Reeroo Maine may eyiinaa kooh jaaliyad iski hiran oo gobolka oo dhon eh oo in adeegaayan baahida bilaamee uurka le qobaan ii waalidiinta haysadaan dhinaanoo usub. Daryeelowka ii martida heerka oo hirfada le, iye iskaashi kila weeldhadaayan si in halo ma'lumaad iyo kheyriyaad oo kaalmeeyaw aafimaadka miirka iyo jirka ee dhinaanka ii reeroo dhon.



### Naasnuujhiyowka Aafimaadka Dadwiinaga (Public Health Nursing - PHN)

Kalkaalisayaalka Aafimaadka Dadwiinaga Maine CDC may biyaayanaa adeegyaaal heerka dhatiis eh oo linki talagali reeroo. Bilaamee umusha kahor ii kudambe ii dhamaan dhinaanoo usub ii dhinaanoo oo deeraayan 12 bilood jir may hala koraana booqasho unku koyto Kalkaalisada Aafimaadka Dadwiinaga. Hoo hayto su'aal ki saabsan aafimaadkaa amase aafimaadka dhinaanka, may warsada kortee kalkaalisoo isla markaas adoo inweeraaso lambarka CradleME.

Si in sawirto koodka QR, furo kaamiradaa appshee qalabkaa ki jiro. Ki toosi Koodka QR maddi roogto may in baahantaa inii sawirto. Bay ku deyaase goodka ogeysiiska oo shaashada korshe ki yaalo-riy si inin raa'do websaydka. Hay'adan may waa adeeg biye fursadiyoo lin simanye.

